Qaybta Adeegyada Naafanimada Maskaxda & Korriinka

Noqoshada Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW)

Waxaa jira tallaabooyin badan oo la xiriira noqoshada qof u qalma oo la oggol yahay Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed ahaan (PSW) ee dhanka barnaamijyada Adeegyada Naafanimada Koriinka ee ka jira Oregon.

MUHIIM AH: Waxaa dhici karta in aadan u shaqeynayn PSW ahaan ilaa DHAMMAAN tallaabooyinka soo socota laga dhammeystirayo

1. Dhammeystirka Baaritaanka Taariikh Dembiyeedka

Baaritaanka taariikh dembiyeedka waa mid la iskaga baahan yahay si loo noqdo qof u qalma oo xaq u leh in uu PSW ahaan uga dhex shaqeeyo gobolka Oregon. Codsiyada baaritaanka taariikh dembiyeedka waxaa hawshiisa qabta Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon (DHS)/Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) Kooxda Baaritaanka Taariikh Dembiyeedka (BCU).

Si aad u codsado baaritaanka taariikh dembiyeedka, meeshan la sii gelayo 'link' ka buuxi foomka codsiga ee dhanka internet-ka: https://forms.gle/hhicabuZE8fPCwjo6 OO nuqulada labada dhinaca ee Aqoonsigaaga email ugu soo dir dd.backgroundchecks@multco.us. Marka aanu helno codsigaaga baaritaanka taariikh dembiyeedka iyo Aqoonsigaaga, shaqaalaha I/DD ee Degaanka Multnomah ayaa kugula soo xiriiri doona email ahaan si uu kuugu qabto balan kulan oo dhanka fiidiyowga ah oo internet ahaan loo qabanayo oo la adeegsanayo Google Meet si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga sida ay uga baahan yihiin Xeerarka Maamulka Oregon (OAR). Fiiri ***Sida looga Qayb galo Kulanka lala leeyahay Google Meet*** wixii macluumaad ah ee ku saabsan Google Meet.

Ka dib markii aanu xaqiijino aqoonsigaaga, shaqaalaha I/DD ee Degaanka Multnomah ayaa bilaabi doonaa codsigaaga baaritaanka taariikh dembiyeedka ee ki jira nidaamka

baaritaanka taariikh dembiyeedka BCU oo loo yaqaano ORCHARDS. Nidaamka codsiga baaritaanka taariikh dembiyeedka waa mid u baahan in aad buuxiso qaybta codsiga ee dhanka internet-ka.

Nidaamka ORCHARDS ayaa kuu soo diri doona email ay la socdaan tilmaamo, Lambarkaaga Aqoonsiga Codsiga iyo meel laga sii gelayo 'link' website-ka oo loogu talagalay in aad adigu codsiga ka buuxiso internet-ka oo oggolaato hubinta diiwaannada. Email-ka waxaa laga soo diri doonaa bcu.orchards@dhsoha.state.or.us wuxuuna yeelan doonaa Baaritaanka cusub ee taariikh dembiyaadka oo lagaaga gudbiyay ORCHARDS "New background check submitted for you in ORCHARDS" oo ku qoran saddarka ujeedada. Fadlan fiiri meesha aad ku hesho email-ka aan kala sooca lahayn/email-ka aan la rabin lagu keydiyo spam/junk email. Waxaad haysataa 21 maalmood ka dib marka email-ka ORCHARD la soo diro in aad ku buuxiso codsiga baaritaanka taariikh dembiyeedka oo oggolaato hubinta diiwaannada. BCU ma qaban doonto hawsha codsigaaga ilaa aad ka buuxiso su'aalaha codsiga oo aad ka oggolaato baaritaanka taariikh dembiyeedka. Codsigaaga waxaa xiri doonta BCU haddi aanad u oggolaanin baaritaanka taariikh dembiyeedka ka hor wakhtiga la qabtay ee kama dambaysta ah.

Natiijooyinka baaritaankaaga taariikh dembiyeedka waxaa kuu soo diri doona shaqaalaha I/DD ee Degaanka Multnomah ama BCU.

Waxaa dhici karta in la iskaga baahdo in faraha la iska qaado 'fingerprints' taasi oo loogu talagalay codsigaaga baaritaanka taariikh dembiyeedka. Waa lagula soo socodsiin doonaa wax kasta oo la xiriira shuruudaha faraha la iska qaadayo ka dib marka codsigaaga baaritaanka taariikh dembiyeedka oo dhammeystiran la gudbiyo si loo hawshiisa loo qabto. Waa lagula soo socodsiin doonaa haddii faraha oo la iska qaado la iskaga baahan yahay, waxaana lagu siin doonaa tilmaamaha la raacayo oo faahfaahsan oo loogu talagalay gudbinta faraha la iska qaadayo.

2. Dhammeystirka Codsiga Diiwaan gelinta Daryeel Bixiyaha iyo Heshiiska

Codsiga Diiwaan gelinta Daryeel Bixiyaha iyo Foomka Heshiiska (PEAA) waa mid la iskaga baahan yahay si laguugu qoondeeyo Aqoonsiga Bixiyaha SPD (oo mararka qaarkood loo yaqaano Lambarka Daryeel Bixinta Medicaid). PEAA si buuxda uma qaban karto hawsha ilaa aad ka haysato baaritaanka taariikh dembiyeedka oo jira. Lambarkaaga Social Security-ga ayaa la iskaga baahan yahay foomka PEAA korkiisa. Foomkan waxaa laga

helayaa meeshan la sii gelayo 'link':
https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/se0734.pdf

3. Dhammeystirka Jihaynta Waajibka ah iyo Tababarka

PSW-yada cusub oo dhan waxaa looga baahan yahay in ay dhammeystiraan jihaynta shaqaalaha cusub iyo tababarka ka hor inta aanan loo qoondeyn Lambarka Aqoonsiga Bixiyaha Medicaid (lambarka Aqoonsiga Bixiyaha SPD) oo Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon u oggolaan in ay shaqeeyaan. Jihaynta iyo tababarka waxaa bixiya Tababarka Carewell SEIU 503. Carewell waxay bixisaa tababarka dhanka internet-ka qofka waqtigiisa ku xiran 'self-paced' oo la helayo 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood toddobaadkii iyo kulamada dhanka internet-ka ee macallinku hoggaaminayo oo dhacaya waqtiyo iyo maalmo kala duwan, oo ay ku jiraan waqtiyada galabtii iyo toddobaadyada dhammaankooda. Macluumaadka jihaynta iyo tababarka waxaa laga helayaa:

Macluumaadka Laga xiriirayo Carewell SEIU 503
Telefoonka: 1-844-503-7348
Email-ka: carewellSEIU503training@risepartnership.com
Website-ka: www.carewellseiu503.org/training/

4. Helitaanka Lambarkaaga Aqoonsiga Bixiyaha SPD

Lambarkaaga Aqoonsiga Bixiyaha SPD waxaa bixiya Xafiiska Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon ee Adeegyada Naafanimada Koriinka Qaybtiisa Maamulka Daryeel Bixiyaha (PAU). Lambarkaaga Aqoonsiga Bixiyaha SPD wuxuu kuu oggolaanayaa in aad hesho lacag bixinta loogu talagalay adeegyada la siiyo macaamiisha. PAU ayaa Lambarkaaga Aqoonsiga Bixiyaha SPD si toos ah ugu soo diri doonta email ahaan. Fadlan fiiri meesha aad ku hesho email-ka aan kala sooca lahayn 'spam' ama email-ka aan la rabin lagu keydiyo 'junk mail'. Waxaad u baahan tahay lambarkani si aad u hesho meel la galo 'login' iyo password si aad u geliso saacadaha aad shaqeyso ee loogu talagalay lacag bixinta waqti dambe ee nidaamka (Fiiri tallaabada 9 ee hoos ku qoran).

5. Dhammeystirka Xirmada Diiwaan gelinta Shaqaalaha ee loogu talagalay Adeega Mushahar bixinta

Iskaashiga Dadweynaha LLC (PPL) ayaa qandaraas la yeelatay gobolka in ay noqoto bixiyaha Adeegyada Hay'ada Maamulka Lagaceed (FMAS) si ay qabato hawsha mushahar bixinta ee loogu talagalay PSW. PPL ayaa diyaarisa oo soo saarta jeegagaaga iyo Foomamka W-2 iyada oo ka wakiil ah Diiwaanka Cidda Loo Shaqeeyo (macmiilka/qoyska). Qof Takhasuska u leh Diiwaan gelinta ee PPL ayaa kugula soo xiriiri doona telefoon ahaan si loo bilaabo nidaamka isku diiwaan gelinta mushahar bixinta. Diiwaan gelinta Shaqaalaha ayaa loo baahan yahay **oo loogu talagalay macmiil kasta oo aad adeeg siiso**.

6. Xiriir la lahaanshaha Nidaamka PPL ee ku aadan Diiwaanka Cidda Loo Shaqeeyo

PSW kastaa waa in uu xiriir la leeyahay Diiwaanka Cidda Loo Shaqeeyo ee macmiilku leeyahay ee ka tirsan Nidaamka PPL. Macmiil kastaa waa in uu leeyahay Diiwaanka Cidda Loo Shaqeeyo oo hore loogu sii dejiyay nidaamka PPL dhexdiisa si PSW loogu xiro Loo shaqeeyahaasi iyo in jeegaga mushaharka ee PSW la soo saaro. Xiriiradan la leeyahay ayaa waxaa nidaamka PPL geliya shaqaalaha I/DD ee Degaanka Multnomah. Tani waxay ka dhigan tahay in qofkaasi loo qoondeeyay in uu noqdo Cidda aad u shaqeyso u baahan yahay in uu dhammeystiro xirmadiisa gaarka ah ee Diiwaan gelinta Cidda loo dhaqeeyo ee PPL haddii aanan isla hadaba mid la dhammeystirin.

7. Xiriirka Shaqada ee Laga Xaqiijiyay Nidaamka Biilka ee eXPRS

Nidaamka eXPRS waa halka aad geliso saacadahaaga shaqada. Xiriirka shaqada ee eXPRS waxaa dejiya PPL ee ka socota xirmadaada Diiwaan gelinta Shaqaalaha. **Xiriirka shaqada waa in lagu dejiyaa eXPRS ka hor inta aan Heshiiska Adeega (tallaabada xigta) lagu soo dirin adiga si aad u saxiixdo.**

8. Saxiixa Heshiiska Adeega

Heshiiska Adeegu wuxuu sharraxayaa adeegyada aad siinayso macmiilkaaga. **Hal Heshiiska Adeega ah ayaa looga baahan yahay macmiil kasta oo aad adeeg siiso.** Heshiiska Adeega waxaa kuu soo diri doona Isku duwaha Adeega ee macmiilka (maamulaha kiiska) marka xiriirka shaqada lagu dejiyo eXPRS ee u dhexeeya adiga iyo macmiilkaaga(macaamiishaada). Ka dib marka aad saxiixdo oo soo celiso Heshiiska Adeega, waxaa lagugu dari doonaa qorshaha adeega ee macmiilka ee eXPRS waxaana loo oggolaadaa in uu bilaabo shaqada. Heshiiska Adeega waxaa lagu dejin doonaa taariikhdaada bilawga shaqada. Isku duwaha Adeega ee macmiilkaaga wuxuu awoodi doonaa in uu kuu xaqiijiyo taariikhdan adiga.

9. Buuxinta Foomka Diiwaan gelinta Isticmaalaha eXPRS

Foomkani waa mid la iskaga baahan yahay si loo helo galitaanka ‘login’/password-ka loogu talagalay gelista website-ka ee Lacag bixinta eXPRS iyo Nidaamka Soo sheegista ee gobolka. Waxaad u baahan doontaa Aqoonsigaaga Bixiyaha SPD ee loogu talagalay Foomka Diiwaan gelinta Isticmaalaha (fiiri Talaaabada 4 ee kor ku qoran). Galitaanka ‘login’ iyo password-ka la’aantiis, ma awoodi doontid in aad saacadahaaga shaqada geliso eXPRS oo gudbiso kaarka waqtiga shaqada ee loogu talagalay lacag bixinta. **PSW oo dhan waxaa looga baahan yahay:**

1. In aad gashaan eXPRS oo aad galisaan wakhtiyada shaqadiinu bilaabanto iyo dhammaato, **oo**
2. Gudbisaan saacadaha la shaqeeyay, **oo**
3. Sameysaan kaarka waqtiga shaqada oo ka socdo eXPRS oo ay ku qoran yihiin taariikhaha iyo saacadaha la shaqeeyay, oo ay weheliyaan goobta laga bixiyay adeega, oo ay ku jiraan saxiixa iyo taariikhda PSW iyo Cidda loo shaqeeyo **labadoodaba**, **iyo**
4. In aad kaarka waqtiga shaqada oo daabacan isla markaana saxiixan u dirtaan I/DD Degaanka Multnomah oo loogu talagalay oggolaanshaha lacag bixinta ka hor inta aan la soo saarin wax jeeg ah oo loogu talagalay saacadahaasi.

Foomka Diiwaan gelinta Isticmaalaha eXPRS ee loogu talagalay PSW-yada waxaa laga heli karaa:

https://apps.state.or.us/exprsWeb/exprsDocs/EnrollIndividualProviderUserPSW.pdf

Kaarka Waqtiyada Shaqada ee PSW: Helitaanka Lacagta

Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon waxay PSW oo dhan ugu baahan tahay in ay taariikhahooda shaqada iyo saacadahooda galiyaan nidaamka eXPRS. **Tani waa shuruud la iskaga baahan yahay.** Hoosta waxaa ku qoran tallaabooyinka la iskaga baahan yahay si aad adigu u hesho jeeg:

1. Waxaad gashaa eXPRS adiga oo isticmaalaya magacaaga lagu gelo 'login name' iyo password-ka lagu siiyay ee ka socda info.exprs@state.or.us. Ka dib gudbinta Foomka Diiwaan gelinta Isticmaalaha, waxaad heli doontaa email ay la socdaan galitaankaaga 'login' iyo password ku meel gaar ah. Tilmaamaha la raacayo ee gelitaanka eXPRS marka u horreysa, fiiri: https://apps.state.or.us/exprsDocs/HowToAccessLoginFirstTimeUsers.pdf

   Note: Haddii aadan sidaasi hore u sameynin, buuxi Foomka Diiwaan gelinta Isticmaalaha eXPRS si aad u hesho magaca aad ku galayso iyo password-ka isticmaalaha eXPRS. Lambarka Aqoonsiga Bixiyaha SPD iyo cinwaan email ayaa la iskaga baahan yahay. Fiiri Talaaabada 8 ee kor ku qoran.

2. Gali waqtigaaga aad shaqeysay waqti kasta oo aad *bilowda* iyo *joojiso* shaqada adiga oo eXPRS ka galaya https://apps.state.or.us/exprsWeb/.

   Fiiri Tilmaamaha Sida Loo Isticmaalo eXPRS EVV ee hoos ku qoran:

   - **Guudmarka eXPRS-EVV ee loogu talagalay Daryeel Bixiyayaasha PSW** https://apps.state.or.us/exprsDocs/OverviewPSWProvidersEVV.pdf

   - **Sida loo Galo & Loo hago eXPRS-EVV** https://apps.state.or.us/exprsDocs/HowToLoginNavigateEVV.pdf

- **Sida Waqti Shaqo looga Bilaabo eXPRS-EVV**
  https://apps.state.or.us/exprsDocs/HowToStartShiftEVV.pdf

- **Sida Waqti Shaqo looga Joojiyo eXPRS-EVV**
  https://apps.state.or.us/exprsDocs/HowToEndShiftEVV.pdf

- **Su'aalaha Inta Badan La iska isweydiiyo eXPRS-EVV (FAQ)**
  https://apps.state.or.us/exprsDocs/EVVFAQ.pdf

- Tilmaamaha la raacayo ee loogu talagalay gelitaanka iyo soo gudbinta saacadahaaga waa la heli karaa internet-ka:
  https://apps.state.or.us/exprsDocs/HowToCreateServiceDeliveryPSWIC.pdf

- Macluumaad dheeraad ah ayaa la heli karaa iyada oo iyada oo la riixiyo Tilmaamaha Caawinta Isticmaalaha eXPRS "eXPRS User Help Guides" ee laga helayo https://apps.state.or.us/exprsDocs/

3. Inta lagu jiro muddada lacag bixinta (maalinta 1-aad ilaa maalinta 15-aad ama maalinta 16-aad ilaa maalinta dambeysa bisha), waxaad gashaa eXPRS oo gudbisaa saacadaha shaqada ee la galay. Daabac kaarka waqtiga shaqada oo ka turjumaya dhammaan saacadahaaga La sugayo go'aankooda 'Pending' ee ku jira eXPRS.

4. Buuxi qoraalada horumarka la sameynayo ee kaarka waqtiga shaqada (ama ujeedada safarka oo loogu talagalay masaafada la socdo 'mileage'). Qoraalada horumarka la sameynayo waa in ay noqdaan guudmarka adeegyada aad bixisay intii lagu jiray shaqadaada buuxisay hadafyada qorshaha adeega ee loogu talagalay macmiilka aad la shaqeysay. Saxiixa iyo taariikhda ayaa sidoo kale looga baahan yahay adiga (PSW) ama Cidda aad u shaqeyso.

5. Saxiixaaga iyo kaarkaaga waqtiga shaqada oo daabacan u dir I/DD Degaanka Multnomah si loo oggolaado iyo qabashada hawsha lacag bixinta: Fiiri Jadwalka Qandaraaska Mushahar bixinta Gobolka Oregon ee PSW ee loogu talagalay muddooyinka lacag bixinta iyo taariikhaha loo qabtay kaarka waqtiga shaqada. Jadwallada Mushahar Bixinta waxaa laga heli kara Tilmaamaha Caawinta Isticmaalaha eXPRS uu ka tirsan Qaybta Kale ee Macluumaadka "Other

Information Section" ee ku jirta boggan internet-ka:
https://apps.state.or.us/exprsDocs/

Kaararka waqtiga shaqada ee aan dhammeystirnayn hawshooda lama qaban doono.
Qandaraaska State/PSW wuxuu kaaga baahan yahay in aad gudbiso kaarkaaga shaqada
muddo ku beegan 5:00 ee maalinta la qabtay ee kama dambaysta ah.
Kaararka waqtiga shaqada ee muddada dambe waxaa hawshooda la qaban doonaa wareega mushahar bixinta ee xiga.

Kaararka Waqtiga Shaqada email ahaan ugu soo dir dd.timesheets@multco.us

Boosta ku soo dir ama kaararka waqtiga shaqada ku dhaaf adiga oo si shakhsi ahaana ugu dhaafaya xafiiska Gresham:

Multnomah County East Building
600 NE 8th Street, Gresham OR 97030

Taageerada Arrimaha Lacag Bixinta iyo Kaararka Waqtiga Shaqada

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan arrimaha lacag bixinta, gelinta saacadaha ee eXPRS, ama arrimaha la xiriira raadinta Oggolaanshaha Adeega ee loogu talagalay gelinta saacadaha, wac:

Khadka Taageerada ee Lacag Bixinta Daryeel Bixiyaha 503-988-9485
ama email u dir dd.timesheets@multco.us

Macluumaad Waxtar leh Oo ku Saabsan Cidda Lala Xiriirayo

Taageerada Isticmaalaha PSW eXPRS

Dhibaatooyinka dhanka farsamada ee la xiriira nidaamka eXPRS, dadkani ayaa ku caawin kara.

Ogow: koontaayinka la xiray waxay si toos ah isku furi doonaa habeenkii.

Telefoonka: 1-844-874-2788 doorashada #3
Email: info.exprs@state.or.us

Sidoo kale fiiri Liiska Caawimaada 'Help Menu' ee ku jira nidaamka eXPRS wixii la xiriira macluumaadka ku saabsan gelinta saacadaha, daabacaada kaararka waqtiga shaqada, sameynta sixid, dib u eegida diiwaanka daryeel bixiyahaaga PSW iyo taariikhaha uu dhacayo oggolaanshaha shaqadu, iwm.

Website-ka eXPRS: https://apps.dhs.state.or.us/exprsWeb

Diiwaan gelinta PSW iyo Macluumaadka Taariikh Dembiyeedka

Nidaamka codsiga baaritaanka taariikh dembiyeedka gabi ahaanba waa dhanka internet-ka. Ma jirto noocyada warqada ah oo la isticmaalay: Daryeel bixiyayaashu waa in ay haystaan cinwaanka email-ka oo sax ah. Macluumaad dheeraad ah ayaa la soo geliyay website-keena: **https://multco.us/dd/idd-provider-resources**

Kala xiriir Kooxda Aqoonsiga Daryeel Bixiyaha ee I/DD ee Degaanka Multnomah wixii su'aalo ah ee ku saabsan xaalada codsiga baaritaanka taariikh dembiyeedka, xaaladaada diiwaan gelinta PSW, ama su'aalaha kale ee la xiriira.

Telefoonka: 503-988-9790
Email: dd.backgroundchecks@multco.us

Taageerada Mushahar Bixinta Macmiilka ee Iskaashiga Dadweynaha LLC (PPL)

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan jeegagaaga, canshuur iska heynta, lacag dhigashada tooska ah, beddelaada cinwaanka, iyo wixii la mid ah, si toos ah ula xiriir PPL. Waxaanu si adag kuugu dhiirigelinaynaa in aad booqato webite-kooda (https://fms.publicpartnerships.com/PPLPortal/login.aspx) oo sameysato meel la galo 'login' iyo password kuu gaar ah. Waxaad markaasi ka dib heli doontaa dhammaan macluumaadkaaga lacag bixinta, oo ay ku jiraan nuqulada jeegaga iyo faahfaahinta lacag bixinta, iyo lacag bixinta hawsheeda lagu jiro, iyo dhammaan noocyada kale ee macluumaad. Dooro "OR FMAS ODDS" iyo "PSW" in ay noqoto doorkaaga marka aad adigu dejinayso website-kooda.

Lambarada Telefoonka Taageerada Mushahar Bixinta Macmiilka ee PPL:

Ingiriiska: 1-888-419-7705
Af-Ruushka: 1-888-419-7734
Isbaanishka: 1-888-419-7720
TTY: 1-888-360-5899

Email: PPLORFMAS-CS@pcgus.com

Xiriirada Kale ee Dhanka Macluumaadka

Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) Qaybta Maamulka Daryeel Bixiyayaasha (PAU)

Wixii macluumaad ama su'aalo ah ee ku saabsan xaaladaada diiwaan gelinta PSW iyo meelaynta lambarkaaga Aqoonsiga Bixiyaha SPD.

Telefoonka: 1-844-874-2788 doorashada #4
Email: psw.enrollment@state.or.us

Nidaamka Diiwaanka iyo Gudbinta ee Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon

Haddii aad daneynayso ahaanshaha PSW loogu talagalay dad dheeraad ah, oo aad rabto in ay dadka kale kaala soo xiriiraan shaqo, waxaad buuxin kartaa sharraxaada oo iska diiwaan gelin kartaa Nidaamka Diiwaanka iyo Gudbinta ee

gobolka oo dhan ee gacanta ku hayso Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon. Tani waa halka qoysaska iyo dadku fiiriyaan marka ay u baahan yihiin in ay shaqaaleysiiyaan PSW. Waxaad u baahan doontaa Aqoonsigaaga Bixiyaha SPD si aad isku diiwaan geliso.

Si aad isku qorto Nidaamka Diiwaanka iyo Gudbinta, la xiriir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon:

Website-ka: www.or-hcc.org
Email-ka: registry.ohcc@state.or.us
Phone: 1-844-874-2788 doorashada #5

Tababarka PSW ee ka socda Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon

Fiiri fursadaha tababarka dheeraadka ah ee la heli karo oo ku qoran **website-ka Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon (OHCC)**.

Jihaynta Dhanka Internet-ka iyo Tababarka Kale ee Carewell SEIU503.

Wixii la xiriira shaqaalaha taageerada shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka guriga.

Website-ka: https://www.carewellseiu503.org/training/

Xarunta Ilaha Xubinta ee SEIU Local 503

Telefoonka: 1-844-503-SEIU (7348)
Website-ka: https://seiu503.org/

PSW ahaan, waxaa ku matalaya ururka shaqaalaha. Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Ilaha Xubinta ee SEIU Local 503 haddii ay hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan mushaharka, saacadaha, qandaraaskaaga, xaaladaha shaqada, sharciyada shaqaalaha, shaqo la'aanta, faa'iidooyinka caafimaad, iyo arrimaha kale ee la xiriira shaqaalaha.

Health Care Trust

La xiriir Health Care Trust haddii aad daneynayso gadashada caymiska daryeelka caafimaad.

Telefoonka: 1-844-507-7554 doorashada 1